Somali | Soomaali

# My Career Insights



## Hagitaan xirfad shaqo oo ku habboon ilmahaaga

Waaxda waxbarashadu waxay sanad walba 9 arday oo dhigta dugsiyada dawlada Victoria siisaa helista qalabka waxbarashada shaqada ee Morrisby ee casriga oo lacag la'aan ah.

Morrisby wuxuu ka caawiyaa ilmahaagu inuu sameeyo xulashooyin ay aqoon u leeyihiin oo ku saabsan dugsiga sare iyo wixii ka dambeeya isagoo sahaminaya waxa ay ku fiican yihiin, danaha iyo fursadaha shaqo.

**Dugsigaagu wuxuu u baahan yahay ogolaanshahaaga si uu ubadkaaga u siiyo marinka Morrisby.**

Barnaamijka Aragtida Xirfaddayda waxay astaanta Morrisby ee ilmahaaga ku lammaaniyaan kal-fadhi la-taliye xirfadeed oo lacag la'aan ah, oo ay taageerto Australian Centre for Career Education (ACCE - Xarunta Waxbarashada Xirfadda ee Australia).

Tani waa fursad muhiim u ah sanadka 9. Waxay ka caawin doontaa ilmahaaga inay cusbooneysiiyaan qorshe hawleedkooda shaqo, inay sameeyaan go'aammo waaweyn iyo inay ku dhiiradaan inay wax bartaan.

| Barnaamijka | | Doorkaaga |
| --- | --- | --- |
| Tallaabada 1<br>**Oggolaanshahaaga** | Waxaa laga yaabaa in dugsigaagu ku weydiiyo inaad buuxiso oo soo celiso foomka oggolaanshaha, ama aad ku bixisid oggolaanshahaaga qaab dhijitaal ah (tusaale ahaan, iyada oo loo marayo Compass). | Raac tilmaamaha dugsigaaga si aad u bixiso oggolaanshahaaga. |
| Tallaabada 2<br>**Barofaaylka (profile) Morrisby** | Dugsigaaga ayaa weydiin doona ilmahaaga inuu buuxiyo su'aalaha Morrisby. Morrisby waxay isticmaali doonaan jawaabahooda si ay u abuuraan barofaayl gaar ah oo:<br>• soo koobaya waxa ay ku fiican yihiin iyo danahooda gaarka ah<br>• waxay soo jeedinaysaa dariiqyada shaqo ee la xidhiidha iyo fursadaha waxbarasho. | Ka war haay xiriirka uu kula soo samaynayo dugsigaaga ee ku saabsan barofaaylka Morrisby iyo waraysiga la taliyaha shaqada.<br>Haddii aad rabto, ku biir ilmahaaga waraysigooda. |
| Tallaabada 3<br>**Kulanka Latalinta Xirfadaha Shaqada** | Dugsigaagu wuxuu qabanqaabin doonaa waraysi aan xidhmo lahayn oo dhexmara ilmahaaga iyo lataliye shaqo oo madax-banaan, oo ay isku dubariday Australian Centre for Career Education. Waxay ka hadli doonaan sida loo fahmo oo loo isticmaalo Morrisby. Waad ku biiri kartaa kulankaan. | |
| Tallaabada 4<br>**Qorshaynta xirfadaha shaqada** | Xogta Morrisby ee ilmahaaga waxay ka caawisaa inay cusboonaysiiyaan qorshe hawleedkooda xirfadaha shaqada, oo ay u kuur galaan xulashooyinkooda waxbarashada sare iyo dariiqyada u furan dugsiga kadib. | Kala hadal ilmahaaga barofaaylkooda, waxa ay xiiseeyaan, meelaha ay ku fiican yihiin, yoolalka iyo fursadaha waxbarasho. |

**Si aad u aragto sida uu barofaaylka Morrisby u caawin karo ilmahaaga, ka eeg muunada barofaaylka Morrisby ee bogga xiga.**

THE EDUCATION STATE

VICTORIA State Government | Department of Education

Australian Centre for Career Education

Morrisby

# Tusaalaha astaanta (profile ka) Morrisby

Barofaaylka Morrisby ee ilmahaaga ee la dhammaystiray waxa ku jiri doona macluumaadka ku saabsan xirfadahooda xagga hadalka, tirooyinka, aan la taaban karin, meelaha iyo sababaynta farsamada. Waxay sidoo kale bixin doontaa maadada dugsiga iyo soo jeedinta xirfadeed ee ka tarjumaysa xirfadahooda shaqsiyeed, danaha, shaqsiyadooda iyo waxa ay doobidayaan.

## Hababka




## Waxa la danaynayo




## Xirfadaha Shaqooyinka




## Goobta shaqada




## Nooca shakhsi ahaaneed




## Caawin xirfad-shaqo oo cimri-dheer

Haddii ilmahaagu buuxiyo barofaaylkooda Morrisby sanadkan, waxay heli karaan inta ka dhiman dugsigooda, iyo wixii ka dambeeya. Marka ay yeeshaan awoodo cusub, dano iyo yoolalka, waxay cusbooneysiin karaan barofaaylka Morrisby si ay u helaan daraasado faa'iido leh iyo talooyin shaqo.

THE EDUCATION STATE

VICTORIA State Government | Department of Education

Australian Centre for Career Education

Morrisby